## NVQs

NVQs (Shahaadada Xirfada Qaranka) waa shaqo ku saleysan shahaadooyinka sida caadiga ah loogu qaato goobta shaqada, ama goobta tilmaanta jawiga shaqada. Shahaadadaan waxay ku caawisaa ardayga inuu hormariyo xirfadaha iyo cilmiga muhiimka u ah shaqo gaar ah. Badelaadaha shaqooyinkaan waa la bixin karaa ama lagu tabaruci karaa, oo waxay dhici kartaa iyada oo la dhameystirayo tababarashada, goobta tababarka, ama adiga oo ka qeybgalayo Kulliyada Waxbarasho Sareama Dugsi. Ma jiraan barnaamij waxbarasho go'an waxaa ku lifaaqan NVQ's, marka waa shaado aad u dabacsan oo lagu diyaarin karo in aad buuxiso waxbarasho gaar ah ama baahiyada xirfada. NVQs waxay ku timaadaa shahaadooyin kala duwan ee u dhigma, ka bilow GCSEs illaa heerarka waxbarashada dugsiga sare dhaafsan, oo waxaa loo heli karaa ku dhawaadkii dhammaan aagaga waxbarashada iyo qeybaha ganacsiga.

NVQs waxay u janjeertaa inay diirada saarto maado gaar ah, iyo sidaas darted waa heer ka yara dabacsan. Waxay aad ugu habooniyihiin ardayda leh fikrada cad ee waxa ay rabaan inay bartaan, iyo shaqada ay jeclaan lahaayeen shaqada ay jecelyihiin inay qabtaan. Sababtoo ah waxay tixgeliyaan noocyo kala duwan ee heerarka balaaran, ay ku haboontahay labadaba dadka yar iyo sidoo kale dadka weyn.

## Warbixin dheer-aad ah

- **Dowlada Ingiriiska (Waaxda Waxbarashada):** www.gov.uk/government/organisations/department-for-education
- **Websaydka Waxbarashada:** www.theeducationwebsite.co.uk
- **UCAS (Warbixinta Waxbarashada Sareysa):** www.ucas.com
- **IntoUniversity Dugsiyada Dheeraadka ah:** www.intouniversityssp.org

## Su'aala?


**Shamiso Lewis** Maamulaha Mashruuca

shamiso.lewis@intouniversity.org

**Alisha Kanabar** Shaqaalaha Mashruuca

alisha.kanabar@intouniversity.org

IntoUniversity Haringey North
Tower Gardens Park
Risley Avenue
London N17 7ER

0208 885 2048


IntoUniversity iu
SUPPLEMENTARY
SCHOOLS PROJECT




# Shaadooyinka

## Nidaamka Waxbarashada Ingiriiska

TEACHERS' TOOLKIT

# Shahaadada Ingiriiska

Buug yarahaan wuxuu bixiyaa dulmarka qaar ka mid ah shahaadooyinka ugu muhiimsan ee dugsiyada laga bixiyo iyo kulliyadaha ee Ingiriiska, Wales iyo Wuqooyiga Ireland; daboolida GCSEs, Heerarka-A,

## GCSE

GCSEs ('Shahaadada Guud ee Waxbarashada Dugsiga sare') waa shahaadooyinka ugu caadisan ee ee laga qaato dugsiga sare. Ardayda, da'dooda 14-16 sanno jirka ah, waxay bartaan ugu yaraan shan maado inta lagu jiro koorsada labada sanno ah ee dugsiga sare. Kadib markay dhaafaan taxanaha imtixaanada ee dhammaadka labada sannno, ardayda waxaa lagu abaalmariyaa shahaadada maado walba.

Ardayda waxay haystaan, illaa hadeer, ee lagu buundeeyay xarafka ku saleysan baaxada, ka bilow 'A*' illaa 'G'. Haddii ardayga uusan si ku fillan oo wanaagsan u soo bandhigin si uu u helo shahaadada, waxaa la siiyaa 'U' (aan la diyaarin/aan la buundeynin) oo ma dhaafaan maadadooda. Si kastaba, ka bilow kuleelaha 2017, maadooyinka waxay yareynayaan bilowga u guurida lambarka ku saleysan baaxada, halka 9 ay tahay shahaadada ugu sareyso ee ardayga gaari karo, iyo 1 waa mida ugu yar. A 'Gudbitaan wanaagsan' ama buunddada isku celcelis, waxaa loo tixgelinayaa 5. Xiliga 2019, dhammaan maadooyinka waxaa lagu buundeynayaa baaxadaan cusub.

Qaadashada GCSEs waxaa inta badan loo arkaa sida muhiimka ku istaagida dhagax ee waxbarashada qofka yar iyo hormarinta xirfada. Guud ahaan, haddii ardayga rabo inuu u hormaro Waxbarasho Dheeraad ah ee Fasalka Lixaad ama Kulliyada, ama ka qeybgalka Jaamacada, waxaa laga rabaaa inay soo barteen GCSEs.

## Heerarka-A-

### Iyo Heerarka-AS

Arday badan ee u dhaxeyso da'da 16 iyo 18 waxay qaataan AS iyo Heerarka A inta lagu jiro labadooda sanno ee ka hartay dugsiga sare (Sannooyinka 12 iyo 13). Shahaadooyinkaan waxaa lagu qaadan karaa midkood isla dugsiga ay ka qeybgalayeen waxbarashadooda dugsiga sare (Tani waxaa loogu yeeraa 'Fasalka Lixaad') ama ka gooniyeysan Kulliyada ku taqasustay shahaadooyinka Waxbarashada Dheeraadka ah. Waxaa laga heli karaa waxbarasho kala duwan (iyo xirfadaha qaar) maadooyinka. Ardayda inta badan waxay qaataan afar maado inta lagu jiro sannadka 12, hoos u ridayo hal maado ka hor bilowga sannadka 13.

Heerarka-AS waxaa midkood loo qaadan karaa sida qeybta koowaad ee shahaadada heerka-A ee buuxo, ama shahaadada kali joogsiga (ka gooniyeysan Heerka-A). Aad ayay caadi ugu tahay ardayda inay dhameystiraan Heerarkooda AS-Levels inta lagu jiro sannadka 12 sida qeyb ka ah Heerkooda-A ee guud, dhameystirka Heerka-A ee buuxo inta lagu jiro Sannadka 13. Ka bilow 2017, Haddii ardayga rabo inuu qaato kaliya Shahaadada Heerka-AS, waa inay qaataan imtixaanka ugu dambeeyo ee dhammaadka Sannadka 12. labada shahaadooyin waxaa loo txigeliyay inay guud ahaanba ka gooniyeysantahay marka ay timaado suuqgeynta, marka natiijooyinka ardayga ee Heerarkooda-AS laguma xisaabinayo dhinaca buundooyinkooda Heerka-A.

Heerarka AS/A– waa shahaadooyinka ugu caadisan ee laga ogolaatay Machadyada Waxbarashada Sare ee Ingiriiska. Jaamacada qaarkood ma ogolaan karaan shahaadooyin kale marka laga gooniyeeyo kuwaan, marka waxay muhiim u noqon kartaa ardayga inuu tixgeliyo midaan marka ka go'aansanayo sannadadooda ugu dambeeyo ee dugsiga sare.

## BTEC

BTECs (Gollaha Ganacsiga iyo Cilmiga farsamada) waa shahaado shaqo ama xirfadeed ee laga bixiyo heerar dhoor ah ee dugsiyada sare sidoo kale sida Machadyada Waxbarashada Sare. Inta lagu jiro dugsiga sare, ardayda waxay la qaadan karaan BTECs koorsooyinka kale (ee GCSE iyo Heerka-A). Sababtoo ah nooca BTECs si yar ayay waxbarasho ahaan diirada u saartaa, waxay inta badan dabagalaan sida badelka lagu baranayo Heerarka-A, inkastoo ay sidoo kale la baran karaan Heerarka-A sidoo kale sida GCSEs. Inta badan koorsooyinka BTEC waxaa loo naqshadeeyay oo loo hormariyay wadatashiga shaqaalaha, jaamacadaha iyo shirkadaha kale ee xirfadlayaasha. Koorsooyinka BTEC waxay isku dareen fasalka barashada iyo tababarka, howlaha shaqada la xiriirto, iyo sidaas darteeda hormarisaa dhoor xirfado oo la gudbin karo, sida iskaashiga kooxda, fikirka hal abuurka, ama xirfadaha bandhiga. Sida ay sababtay, waa qaab aad u wanaagsan ee la isugu geeyo barashada cilmiga ee dugsiga ama kulliyada iyo xirfada gacanta iyo hormarinta cilmiga si markaas loo hormariyo waxbarashada xigta ama heerka xirfada nolosha.

BTECs waxay u tahay dooq wanaagsan ardayda daneyneyso qeybta qaarkood ama warshada, laakin dareemaa wax ka yar hubaalka ku saabsan shaqada gaarka ah ee ay jeclaan lahaayeen inay dabagalaan. BTECs waxay siisaa ardayda xirfadaha ay u baahanyihiin inay Horay ugu dhaqaaqaan ama Waxbarashada Sare, shaqada kumeelgaarka ah, ama si toos ah u aado shaqada. Boqolkiiba 95% ee jaamacadaha Ingiriiska waxay ogolaadaan ardayda wato shahaadooyinka BTEC iyo Heerarka-A. Haddii ardayga daneynayo jaamacada gaarka ah ee aanan ogolaanin BTECs, waa muhiim in laga warqabo midaan marka aad go'aansaneysid shahaadooyinka la dabagalo sannadka 12 iyo 13.